

Nofeembar 7, 2024

Gobolka DeKalb ayaa wuxuu Maamuusayaa Bandhiga Waxbarashada Ugu fiican ee Sannadlaha 11^{aad}

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) waxay u dabaaldegtay barayaashooda iyo shaqaalahooda ugu wanagsan Nofeembar 2 ee *Bandhiga Heerka sare ee Waxbarashada Machadka Sannadlaha 11aad* ee Xarunta Kongareeska Georgia World.

Munaasabada ayaa lagu ammaanay dhammaan shaqaalaha heer dugsiyeedka sannadka oo wax qabadkooda la taaban karo, iyadoo ugu dambeyntii lagu dhawaaqay shanta guuleystayaasha gaarka ah ee Degmadoo dhan. Hogaamadaan aan caadiga aheyn waa:

- **Macalinka Sannadka**
Latalia Robbins, *Dugsiga Hoose Smoke Rise*
- **Maamulaha Sannadka**
Dhaqatar Susan Stoddard, *Dugsiga Sare Lakeside*
- **Xirfadlaha Taageerada Waxbarashada I ee Sannadka**
Nicole Jones, *Dugsiga Hoose John R. Lewis*
- **Xirfadlaha taageerada Waxbarashada II Sannadka**
Tera Reid, *Eagle Woods Academy*
- **Xafiiska Degmada ee Xirfadlaha Taageerada Waxbarashada ee Sannadka**
John "Q" Kegler, *Waaxda Isgaarsiinta*

Kormeeraha guud Dhaqatr Devon Q. Horton ayaa ku ammaanay mudanayaashan iyo asxaabtooda hormarka la taaban karo ee ay Degmada sameysay sannadkii la soo dhaafay..

"Markaan dib u milicsado sannad dugsiyeedka hore oo aan eego waxa degmada u suurogashay inay qabato, waan sii wadi karaa oo sii socon karaa wax ku saabsan guusha macalimiinta shaqsiya, dugsiyada gaarka ah, aagaga, iyo si wadajir ah degmo ahaan," Dhaqatar Horton ayaa yiri.

"Si wada jir ahaan, waxaan ka sameyneynaa dhaqaaqyada la taaban karo iyo qeylo la taaban karo gudaha K-12, oo waxaa sabab u ah shaqsiyaadka fadhiya qolkaan," Dhaqatar Horton ayaa ku daray. "Waan ku mahadnaqeynaa dhammaan waxaad qabataan."

Bandhiga sannadlaha wuxuu u dabaaldagayaa dadaalka, ka go'naanta, iyo guulaha barayaasha iyo shaqaalaha taageerada DCSD. Laga soo bilaabo hormarinta qaababka waxbarida hal abuurka leh illaa bixinta hogaaminta gaar ah iyo taageerada muuqaalka dambe, shaqsiyaadkaan waxay si weyn u saameeyeen howlgalka DCSD ee lagu gaarsiiyo waxbarasho tayo leh.

Abaalmarinada Bandhiga Heerka sare ee Waxbarashada Machadka Sannadlaha 11aad waxaa kafaala qaaday Coca-Cola, Georgia United Credit Union, Herff Jones, Lincoln Investment, Lowe&CO, iyo Voya.

Wixii liis dhameystiran oo dhammaan shaqaalaha heer dugsiyeedka ee sanadka 2024-25, fiiri hoos.

Sawirada Abaalmarinada Bandhiga Heerka sare ee Waxbarashada Machadka Sannadlaha 11^{aad}, fiiri: <https://flic.kr/s/aHBqjBQTP5>.

Muuqaalka munaasabada, fiiri: <https://www.youtube.com/watch?v=P4eEn9YicpA>